Fiican in la ogaado

# Haddii ilmahaaga aanu tallaalnayn

Folkhälsomyndigheten

Miyaa ilmahaaga aynan lahayn difaaca ka hortaga mid ka mid ah cudurada ku xusan barnaamijka tallaalka ee loogu talagalay carruurta ku nool dalka Iswiidhan? Markaas waa inaad ka fikirto dhowr wax oo muhiim ah marka ay noqoto cudurada khatarta ku ahaan kara carruurta.

**La hadal shaqaalaha daryeelka caafimaadka.**
Marka ilmahaagu u baahdo daryeelka bukaanka waa inaad mar kasta u sheegto shaqaalaha in ilmahaaga aan loo tallaalin sida waafaqsan barnaamijka tallaalka Iswiidhan ee carruurta. Iyagu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan arrintan si ay u awoodaan inay ilmahaaga siiyaan daryeel sax ah iyo si ay uga hortagaan in cudur faafo.

**Ka warhay xaaladda xilliga safarka.**
Cudurada sida cudurka cunaha ku dhaca iyo jadeecada ma ku aha caadi dalka Iswiidhan laakiin way ka jiri karaan dalka dibaddiisa. Sidaas darteed waa muhiim in markii ilmaha ay socdaal kula wehlinayaan aad aqrisato warbixin xiriir la leh shuruudaha tallaalka ee khuseeya dalka aad socoto. Barta internetka 1177.se waxaad ka aqrisan kartaa warbixin fiican oo ku saabsan arrintan. Waxaad kale oo u baahan tahay inaad ogaato sida aad ula xiriirayso daryeelka bukaanka marka aad joogto dal kale oo aan ahayn Iswiidhan.

**Uga sheeg ilmaha**
Xaaladaha qaarkood dhinaca nolosha khatarta in la qaado cudurro way ka badan tahay sida caadiga ah, tusaale ahaan xilliga socdaalada dalka dibaddiisa iyo shaqooyinka qaarkood. Ilmahaagu wuxuu u baahan yahay in uu ogaado noocyada cudurrada iyada ama isaga aan weli laga tallaalin.

**Ku soo dhawow inaad nala soo xiriirto.**
Adigu wakhti kasta ayaad dhammaystiri kartaa tallaalada ilmahaaga dhaafay. Dhammaan carruurta aan weli 18 sano buuxin waxaa la siiyaa fursadda dhammaystirid ee dhinaca barnaamijka tallaalka ee guud.

## SI GAAR AH UGA FIKIR TAN

**Nabar wasakh ama ciid leh?**
Haddii ilmahaagu laga tallaalin teetano oo leeyahay nabar wasakh ama ciid leh ama xayawaan qaniinay waa inaad isla markiiba raadsataan daryeel caafimaad. Teetano waa cudur aad khatar u ah oo waa muhiim in si dhakhso ah loo helo daryeel lagaga hortago.

**Dhallankaagu mala kulmay qof qufacaya?**
Haddii ilmahaagu ka yaryahay lix bilood oo la kulmay qof qaba xiiq dheer waa inaad raadsato daryeel caafimaad isla maalintaas. Xiiq dheertu waa cudur si fudud loo kala qaado oo khatar badan ayay u leedahay carruurta yar yar.

**Raadsasho daryeel caafimaad?**

**Wac marka hore**
Cudurada qaarkood si aad ah ayaa loo kala qaadaa. Sidaas darteed waa inaad mar kasta Hagida Daryeelka ka wacda 1177 ka hor inta idinku aydaan tegin rugta deg-dega ah ama rugta caafimaadka. Shaqaalaha jooga goobta waxay u baahan karaan inay isu sii diyaariyaan in laga hortago in cudurkan ku faafo dadka kale ee jooga tusaale ahaan qolka sugitaanka.

Haddii ilmahaagu si khatar ah u xanuusanayo waa inaad raadsataa daryeel caafimaad isla markiiba. Markay jirto xaalad deg-deg ah waa inaad wacdo 112.

SKYDD FÖR LIVET

# Cudurada ilmahaaga laga badbaadi karo iyadoo tallaal la adeegsanayo

Halkan waxaad ka akhrin kartaa warbixin dheeraad ah ee ku saabsan cudurada ku jira barnaamijka tallaalka ee ilmahaagu looga badbaadi karo iyadoo tallaal la adeegsanayo.

**Rotavirus** waa Infeekshan caloosha ku dhaca oo sababa shuban, matag iyo jirka oo qallala. Mararka qaarkood waxaa ilmuhu u baahan karaa in daryeel caafimaad lagu siiyo isbitaal.

**Cudurka cunaha ku dhaca** waa infeekshan cunaha ah oo aad loo kala qaado ahna khatar kaas oo dhaawacyo nolosha halis ku ah ku keeni kara wadnaha, keliyaha iyo hab-dhiska dareen-wadayaasha.

**Teetano** waxaa sababa bakteeriye ku jirta ciidda iyo xiidmaha caloosha ee xayawaanka. Ilmaha waxaa ku dhici kara teetano haddii xayawaan qaniinay ama nabar uu wasakh yeesho. Ilmaha waxaa ku dhaca muruqroorka muruqyada kaddib waxaa ku adkaata liqidda iyo neefsashada. Teetano ma kala qaadaan dadku.

**Xiiq dheerta** aad ayaa loo kala qaadaa oo waxay keentaa qufac aan kala go' lahayn oo xun iyo qufac jiri kara dhowr bilood. Ilmaha dhalanka ah halis buu cudurkani ku noqon karaa.

**Cudurka dabayshu** wuxuu dhaawacyo u keenaa hab-dhiska dareen-wadayaasha taas oo keeni karta curyaamid iyo d aawacyointa nolosha qofka ka hartay.

**Bakteeriyada sababta xanuunka dhegaha, Haemophilus influenzae nooca B (Hib)** wuxuu keeni karaa infeekshanno khatar ah, gaar ahaan dhinaca carruurta ka yar shan sano. Hib wuxuu sababi karaa bararka xuubka maskaxda kaasoo noolasha halis u ah ama sababta dhaawacyo joogto noqda.

**Bakteeriyada sababto xanuunka ku dhaco xubnayaasha laga neefsado** waxay ilmaha ku keeni kartaa infekshan ku dhaca dhegaha iyo sanqada iyo xitaa cuduro khatar ah sida bararka sambabada, dhiiga oo sumooba iyo bararka xuubka maskaxda.

**Jadeecada** aad ayaa loo kala qaadaa oo waxay keentaa xummad sarreysa, qufac iyo finan. Ilmaha ay ku dhacdo jadeecada, waxaa kaddib ku dhaca cudurro kale sida caallir/humbuluuluqa xuubka maskaxda, caallir/humbuluuluqa dhegaha iyo caallir/humbuluuluqa sambabada. Mararka qaarkood cudurka jadeecada waa loo dhiman karaa.

**Cudurka sababa xanuun ah daamanka oo barara** waa cudur aad loo kala qaado oo ku dhaca ugu horeyn qanjidhada candhuufta laakiin keeni kara cudurro marka dambe sida caallir/humbuluuluqa xuubka maskaxda iyo caallir/humbuluuluqa maskaxda. Wiilasha waxaa ku dhici kara caallir/humbuluuluqa xiniinyaha ah.

**Faayraska sababo cudur jirka u yeeli finan yar yar** badanaaba waa infeekshan khafiif ah laakiin haddii haweeney uur leh uu ku dhaco waxaa badan khatarta in ilmuhu ka soo dhaco ama in ilmuhu ku dhasho dhaawacyo uurjiifka oo halis ah.

**Humant papillomvirus (HPV)** wuxuu caabuq ku keenaa maqaarka iyo xuubyada jilicsan. Infekshankan way yaryahay in la dareemo oo badanaaba iskiis ayuu u bogsadaa. Marka infekshankani aanu bogsan ayuu keeni karaa isbaddalo unugyada jirka ah oo sababi karaa kansarka ku dhaca dhuunta ilmogaleenka iyo xitaa noocyo kale oo kansar ah wakhtiyada dambe eenolosha.

### WAA BILAA KHARASH

Tallaalyadan waa bilaash ilaa iyo inta ilmuhu ka yaryahay 18 sano. Marka ilmuhu noqdo qof weyn, micnihii buuxiyo 18 sano waxaa tallaalyada lagu bixiyaa rugta caafimaadka ama rugta tallaalka iyadoo qofku lacag bixiyo.

**Cagaarshow nooca B** wuxuu sababaa caallir/humbuluuluqa beerka. Dadka badankoodu wayka bogsadaan infekshankani laakiin mararka qaarkood faayrasku wuxuu ku sii haraa jirka oo sababi karaa dhaawacyo gaara beerka ama kansarka beerka wakhtiga mustaqbalka. Khatartan waxay sii badan tahay haddii qofka uu ku dhaco xilliga carruurnimada.

---

**Ma doonaysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato?**
Haddii aad su'aalo qabtid waxaa mar kastaba lagugu soo dhaweynayaa inaad la xiriirto xaruntaada caafimaadka carruurta (BVC) ama qeybta caafimaadka ardayda ee iskuulka

FOLKHÄLSOMYNDIGHETEN, ARTIKEL 23176-3, SOMALISKA. FORM: SÖDRA TORNET.

## BARNAAMIJKA TALLAALKA EE ISWIIDHAN

Halkan waxaad ka aqrisan kartaa tallaalada lagu casuumo dhammaan carruurta ku nool dalka Iswiidhan si looga hortago cudurada khatarta ah.

